

Xafiiska Hoggaanka socdaalka ee Lappeenranta waxaa uu bisha Juun u guuri doonaa daarta xafiisyada dowladda (virastotalo) ee ku taalla bartamaha magaalada

Xafiiska Lappeenranta waxaa uu u guuri doonaa xarun cusub oo ku taalla bartamaha magaalada, cinwaankeeduna uu yahay Pormestarinkatu 1, Lappeenranta. Xafiiska cusub waxaa uu ku dhex yaallaa daarta xafiisyada dowladda (virastotalo), halkaasoo ay ku yaallaan xafiisyada kale ee tirada badan ee dowladda.

Guuristaas awgeed in muddo ah ayaa la joojin doonaa, adeeggii macaamiisha iyo waraysiyadii magangelyoddoonista, waxaana loo wareejinayaa goobta cusub. Xafiiska cusub waxaa la furii doonaa Isniinta 20.6.2022.

Xafiiska adeegga macaamiisha waa uu xiran yahay muddada u dhexeysa 9.6.–17.6.2022, guurista awgeed

Xafiiska adeegga macaamiisha ee Lappeenranta waxaa uu furan yahay laga bilaabo 20.6. maalmaha Isniinta, talaadada arbacada iyo jimcaha, saacadda 8.00–16.15. Xafiiska adeegga waa uu xiran yahay maalin kasta oo khamiis ah. Xilliyada ay furan tahay goobta arrimaha danodhamaysiga ee kaltanka lambarka loo qaato, waxaad ka eegtaa bogga internetka ee [Palvelupisteet](#).

- Marka aad doonayso in aad ballan ka qabsato xafiiska adeegga ee cusub ee Lappeenranta, waxaad qaybteenna adeegga ee ballan qabsashada ([ajanvarauspalvelu](#)) ka doorataa magaca ah goobta adeegga ee Lappeenranta (Lappeenrannan palvelupiste). Magaca hadda ku jira adeegga ballan qabsashada ee haatan la isticmaalo iyo midka la joojin doono waa (Lappeenrannan palvelupiste, Valtakatu).

Xafiiska adeegga waxaad ka dhammaysan kartaa arrimaha ay ka midka yihiin

- dhigista codsiyada ku saabsan sharciga degganaanshaha, diiwaangelinta Midowga yurub, dhalashada ama baasaboorka
- u imaanshaha aqoonsiga shakhsinnimada.

Haddii aad deggan tahay agagaarka Lappeenranta oo sharcigaaga degganaanshaha ama baasaboorka uu kaa dhacaayo muddada u dhexeysa 9.6.–19.6.2022,

Waxaad codsiyada dhigi kartaa

- adigoo ka samaynaaya adeeggeenna internetka ee [Enter Finland](#) -
- ama iimeeyl ku soo diraya cinwaanka iimeeylka ee ah: hakemukset(a)migri.fi. Waxaad heleysaa jawaab ku saabsan tallaabooyinka muhiimka ah ee ay tahay inaad samayso.



Waraysida magangalyoddoonista iyo wargelinta go'aanka magangalyoddoonista, waa la joojinayaa muddada u dhexeysa 13.6.–26.6.2022

Waraysiyada magangalyoddoonista iyo wargelinta go'aammada magangalyoddoonista waxaa lagu qaban doonaa xafiiska cinwaankiisu yahay Pormestarinkatu laga bilaabo 27.6.2022.

Waraaqda ku saabsan u yeerista ballanka warasyiga magangalyoddoonista iyo munaasabadda wargelinta, ayaa lagu soo qorayaa halka kulanku uu ka dhacaayo.

Lappeenranta waxaa ka shaqeeya gaadiid dadweynaha oo aad u fiican

Lappeenranta waxaad ku imaan kartaa si fudud, adigoo soo raacaaya baska ama tareenka. Qofka soo qaadanaaya gaarigiisa waxaa uu dhigan karaa baarkinka lacagta ah ee ku teedsan waddada Pormestarinkatu dhinaceeda, kuwaasoo ku yaalla ka soo horjeedka halka laga soo galo xafiiska. Kaartada ka fiiri halka uu ku yaallo xafiiska cusub ([kartta](#)).